Xuquuqda Aadanaha Ee Biritish Kolombiya: Waxyaabaha ad u baahan tahay in ad ogaatid

Warqaddaan xogsheegta ah waxaa loo sameeyey in ay kaa caawimto fahamka xuquuqda aadanaha ee Biritish Kolombiya. Haddii ad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan arin ku khusaysa, fadlan la xiriir **Rugta Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya**. Macluumaadka halka lagala xiriiri karo waxaa laga heli karaa dhammaadka warqaddaan xogsheegta ah.

Biritish Kolombiya waxay leedahay sharci ay ku ilaaliso kuna horumariso xuquuqda aadanaha. Sharcigaas waxaa loo yaqaan *Xeerka Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya* ama *Xeerka* (*BC Human Rights Code* or the *Code*). Xeerku wuxuu gacan ka geystaa in lagaa ilaaliyo takoor iyo dhibaatayn. Wuxuu kuu ogolaanayaa in ad dacwad u gudbisid **Guddiga Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya** haddii ad rumeysan tahay in lagu takooray.

Waxa kaloo *Xeerku* kaa ilaalinayaa **aargoosi** haddii ad dacwad gudbisid, ama damacsan tahay in ad gudbisid ama si kale ugu lug leedahay. Waa **aargoosi** haddii qof ad dacweysay isku dayo in uu dhib kuu geysto ama si kale kaaga daba tago.

Sidee Xeerku ii ilaalinayaa?

Gobolka Biritish Kolombiya, waxaa ku ilaalinaya *Xeerka Xuquuqda Aadanaha* haddii ay sababtu tahay sifo gaar ah oo Xeerku qeexay. Sifooyinka gaarka ah ee xeerku qeexay (dhawrsan) waa kuwaan hoos ku qoran.

Gobolka Biritish Kolombiya waa sharci darro in qof lagu takooro ama dhibaateeyo sababtuna ay tahay:

- sinji, midab, abtirsiinye, meesha u ku dhashay
- Diin
- Xaaladda guur
- Meekhaanka qoys (ma khusayso iibsiga dhulka)
- Jirka ama maskaxda oo dhimman
- Jinsi (sida nin, naag, labeeb ama qof jinsigiisa baddalay. Waxaa kaloo ka mid ah naag uur leh, ilma nuujinaysa, iyo dhibaatayn galmo)
- Dookha galmo (sida qof caadi ah, khaniis, khaniisad ama laba dookh leh)
- Da'da (19 iyo wixii ka weyn, ma khusayso iibsiga dhulka)
- Xukun dambi ciqaabeed (waxay khusaysaa shaqada oo kaliya)
- Mabda' siyaasadeed (waxay khusaysaa shaqada oo kaliya)
- Ilaha dhaqaale oo sharciga waafaqsan (waxay khusaysaa guri ijaarashada oo kaliya)

Xeerku yuu qabtaa (khuseeyaa)?

Xeerku wuxuu qabtaa dhammaan ganacsatada, hay'adaha iyo adeegayaasha dadweynaha Biritish Kolombiya marka laga reebo kuwa hoos yimaada dawladda dhexe. Wuxuu dadka ka ilaaliyaa takoorka ka dhaca sida goobaha shaqada, dukaamada ama makhaayadaha ama ka dhex dhaca hantilayaasha guryaha iyo guri ijaartaha.

Wuxuu dadka ka ilaaliyaa takoorka ka dhaca warfaafinta daabacan. Waxa kaloo uu dadka ka ilaaliyaa dhanka shaqada, ijaarashada iyo iibsiga dhulka.

Waa maxay takoor?

Gobolka Biritish Kolombiya, waa takoor haddii si xun laguu la dhaqmo ama xuquuq laguugu diido sabab sifo gaar ah oo ad leedahay awgeed.

Tusaaleyaal takoor

- Qof haween ah oo shaqadii looga eryey sabab uur awgeed
- Lammaane guri looga ijaari waayey sabab khaniisnimo awgeed
- Qof shaqo loogu diiday sabab jirka ama maskaxda oo dhimman awgeed
- Qof dumar ah oo la siiyo mushaar ka yar kan la siiyo nin ay isku shaqo qabtaan
- Qof shaqaale ah oo lagu khasbay in uu hawlgab golo da'diisa awgeed

Waa maxay dhibaatayn (harassment)?

Dhibaatayn waa nooc ka mid ah takoorka. Waxay noqon kartaa ereyo ama falal kugu xadgudba ama ku bahdila. Waa dhibaatayn marka qof si joogta ah kuugu yiraahdo ama kuugu sameeyo waxyaabo cay iyo xadgudub ah. *Xeerku* wuxuu kaa ilaalinayaa marka dhibaatayntu ay ku salaysan tahay sifo gaar ah oo dhawrsan kuna hoos qoran "Sidee Xeerku ii ilaalinayaa". Waxaa jira noocya badan oo dhibaatayn ah.

Tusaaleyaal dhibaatayn ah

- Shukaansi ama codsiyo galmo oo adan doonayn
- Salaax ama taabasho jirkaa oo adan doonayn
- Qof jirkiis oo lagu dhaygago ama lagu yiraahdo hadalo aysan doonayn
- Kaftan ku salaysan jinsi, dookh galmo ama ereyo sinji caayid ah
- Ereyo kaftan ah ama cay ah oo dad lagu yiraahdo oo ku saabsan sabab jinsi, uur, sinji, jirka ama maskaxda oo dhimman awgeed

Waa maxay waajibka xil iska saariddu?

Loo shaqeeyeyaasha, hantileyaasha guryaha, iyo dadka u adeega dadweynuhu waa inay aad xil iskaga saaraan tixgalinta sifooyinka gaarka ah ee ku qeexan *Xeerka*. Arrintaas waxaa loo yaqaan **waajibka xil iska saariddu**. Xil iska saariddu waxay ku xirnaanaysaa xaaladda gaarka ah ee markaa taal.

Tusaale, waxaa loo shaqeeyaha looga baahnaan karaa in uu:

- Qof shaqaale ah siiyo tababar dheeraad ah
- Wax ka baddalo jadwalka shaqada
- Wax ka baddalo ama soo iibiyo qalab
- Wax ka baddalo shaqooyinka u qabto qof shaqaale ahi

Waajibka xil iska saariddu waxa kaloo macnihiisu yahay in uu yahay waajib sharci ah oo faraya in wax laga baddalo siyaasad, hab dhaqan ama

adeeg. Tusaale, baahida qof weyn ayaa waxay kallifi kartaa in wax laga baddalo sidii caadiga ahayd ee shaqada loo qaban jiray qofkaas da'diisa awgeed. Diidmada in ad wax ka qabatid baahidaa intii macquul ah waxay noqon kartaa takoor haddii aysan wax ka qabashada baahidaasu keeneyn **dhibaato xad dhaaf ah**.

Masuuliyadda **waajibka xil iska saariddu** wuxuu saaran yahay loo shaqeeyaha, hantilaha guryaha, ama qofkii adeeg siiya dadweynaha.

Ujeeddadu ma muhiim baa (shardi)?

Takoorku ma aha in uu yahay mid loo kasay (qasday) si uu u noqdo mid sharciga ka soo horjeeda. Taa macnaheedu waxaa weeye haddii qofka hadalka ama falka sameeyey uusan wax dhib ah ula jeedin, taasu waxay wali noqonaysaa takoor marka dhanka sharciga laga eego.

Sidee baan ku ogaanayaa in la iga galay dambi lid ku ah Xuquuqda Aadanaha?

Marka ad gudbinaysid dacwad ku saabsan *Xeerka* Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya, waa in ay jiraan **dhammaan arrimaha soo socda**:

- ✔ In si xun laguu la dhaqmay ama xaq ad leedahay laguu diiday.
- ✔ Waa in uu jiraa xiriir ka dhexeeya sida laguu la dhaqmay (si xun ama xaq laguu diiday) iyo sifo gaar ah oo ku qeexan *Xeerka* – sida sinjigaaga, midabkaaga, diintaada, jinsigaaga, jirkaaga ama maskaxdaada oo dhimman, ama dookhaaga galmo.
- ✔ Falku waa in uu ka dhacay meel ah sida goob shaqo, dukaan ama makhaayad, ama u dhexeeyo hantile guri iyo guri ijaarte (kireyste).

Dacwaddaada waa in ad gudbisid lix bilood gudohood marka falku dhaco dabadeed. (Xusuusnow: Waxaa jira marar aysan muddadaasu khusayn.) Markaad dacwad gudbisid waxaa bilaabmaya hannaan sharci oo la mid ah kan maxkamadda. Qofka dacwadda gudbiya waxaa loo yaqaan **dhibbane**.

Wax ka qabashada takoorka iyo dhibaataynta

Waxaa jira tallaabooyin gaar ah oo ad qaadi kartid haddii lagu takooro ama dhibaateeyo.

- Haddii an dhib ka imaanayn, qofka u sheeg in falalkiisa ama hadalkiisa an la qaadan karin uuna kaa joojiyo.
- Meel ku qoro dhab ahaan wixii dhacay iyo goortii ay dhaceen iyo wixii la yiri.
- Haddii takoorka ama dhibaatayntu ka dhacday goob shaqo, guriga ad deggan tahay, dukaan ama makhaayad, u sheeg cidda ad u shaqaysid, hantilaha guriga ama maareeyaha in ay arinta wax ka qabtaan.
- Markaad dacwad gudbinaysid raac nadaamka dacwooyinka gudaha ee goobta shaqo ama iskool. Tusaale, haddii takoorka ama dhibaatayntu ka dhacday goob shaqo adna xubin ka tahay ururka shaqaalaha, weydiiso wakiilkaaga ururka shaqaalaha in uu ku caawimo.

Halkee baan caawimaad ka heli karaa?

Dhibbaneyaashu meel kasta oo ay joogaan gobolka waxay macluumaad ka heli karaan **Rugta Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya**. Shaqaalaha jooga Rugta ayaa waxay kaa caawimi karaan fahamka *Xeerka Xuquuqda Aadanaha* ama sidii ad wax uga qaban lahayd dacwad xuquuqda aadanaha ah ee gobolka. Waxaa dhici karta in ad xaq u yeelatid adeegyo kaloo kala duwan. La hadal qof Rugta jooga si ad u ogaatid wixii ad xaq u leedahay.

Rugta Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya (BC Human Rights Clinic)

300-1140 West Pender Street, Vancouver, B.C. V6E 4G1
Telefoon: 604 622-1100
Telefoon Lacag la'aan ah: 1 855 685-6222
Fakis: 604 685-7611
Bogga Internetka: www.BCHRC.net

Haddii adiga qof dacwad kaa gudbiyo, waxaa tahay **eedeysane**. **Eedeysaneyaashu** meel kasta oo ay ka joogaan gobolka iyo **dhibbaneyaasha** nawaaxiga Victoria waxay macluumaad ka heli karaan ayagoo la xiriiraya:

Jaamacadda Victoria (University of Victoraia)

Law Centre Clinical Law Program
Qolka 225 – 850 Burdett Avenue, Victoria, B.C. V8W 1B4
Telefoon: 250 385-1221
Telefoon lacag la'aan ah: 1 866 385-1221
Iimeyl (E-mail): reception@thelawcentre.ca

Waxaa dhici karta in laguu diro **Guddiga Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya** si ad dacwaddaada u gudbisid.

Guddiga Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya (BC Human Rights Tribunal)

Qolka 1170 – 605 Robson Street, Vancouver, B.C. V6B 5J3
Telefoon: 604 775-2000
Telefoon lacag la'aan ah: 1 888 440-8844
Dadka wax maqalku dhimman yahay (TTY): 604 775-2021
Bogga Internetka: www.bchrt.gov.bc.ca

Macluumaadka warqaddaan waxaa loogu talagalay baahiyaha macluumaadka guud oo kaliya. Looguma talagalin in uu ku siiso ama kuu baddalo latalin sharci.